



COVID-19

Shuruudaha Booqashada Qeybta Dhallaanka

Shuruudaha booqashada ee soo socda waxay khuseeyaan qeybaha dhallaanka ee NICU, SCN, ama ICC

Talooyin Guud:

- Waalidka/masuulka sharciga ah waxay booqasho ku imaan karaan 24-ka saac ee maalin kasta. Dadka kale oo dhan, saacadahooda booqashada waa 8-da aroornimo ilaa 9-ka fiidnimo
- Waalidka/masuulka sharciga ah iyo dadka booqashada waxaa khasab ku ah in ay xirtaan gafuurxir inta ay isbitaalka joogaan, xataa haddii ay soo qaateen tallaalka.
- Waalidka/masuulka iyo dadka booqashada ah waa in la weydiyo xaalka caafimaadkooda maalin kasta oo waa la celin karaa haddii wax xanuun ah looga shakiyo.
- Halkii mar lama oggola dad ka badan 3 qof in ay ag fariistaan sariirta bukaanka. Aanka badneyn 4 qof maalintii oo dhan. Dadkaas waxaa ku jira waalidka/masuulka sharciga ah. OGOW: Culumada diinta kama mid aha dadka booqashada ah balse mar kasta ayey ag joogi karaan sariirta bukaanka iyadoo ay joogaan 3 qof, laakiin waa inay xiran yihiin gafuurxir oo la soo weydiyo xaalka caafimaadka.
- Carruurta u dhaxeysa 2 jir ilaa 17 jir waa in ay ka soo jeedaan qoyska bukaanka si ay isbitaalka u yimaadaan.
 - Carruurta ka yar 2 sano ma soo booqan karaan.
 - Carruurta da'doodu tahay 2-4 waxaa loo oggolaan doonaa booqasho hal mar ah si ay ula kulmaan walaalkood ama walaalhood.
 - Carruurta da'doodu u dhaxeeyso 5-11 waxaa loo oggolaan doonaa booqasho 30 daqiiqo ah toddobaadkii.
- Waa in aan wejiga la iska taaban oo gacmaha la dhaqdo marar badan.
- Booqashada waxaa wax ka beddeli kara shaqaalaha oo eegaya xaalka ilmaha bukaanka ah.
- Waxaa macquul ah in dadka qaarkood laga yeelo booqashada, laakiin dadkaasi waa in ay kala hadlaan Maamulaha Daryeelka Bukaanka (Patient Care Manager).

Gafuurxirku waa shuruud:

- Waalidka/masuulka sharciga ah iyo dadka booqashada ah waxaa khasab ku ah in ay xirtaan gafuurxir mar kasta oo ay isbitaalka joogaan.
- Waalidka/masuulka sharciga ah iyo dadka booqashada ah waa in ay wataan gafuurxirka ay istimaalayaan. Haddii aysan haysan gafuurxir, waa la siin doonaa.
- Waalidka/masuulka sharciga ah waxa ay gafuurxirka isaga bixin karaan oo keliya qolka bukaanka, sida marka ay wax cunayaan, iyo marka ay qolka ka baxaan shaqaalaha isbitaalka Children's.
- Dadka booqashada ah ee aan ka soo jeedin qoyska bukaanka waa in ay isticmaalaan gafuurxir mar kasta. Waxaa la ilaalinayaa ilmaha xanuunsan oo khatar ku jira,
- Haddii ay waalidka/masuulka sharciga ah habeenkii seexanayaan qolka bukaanka ee isbitaalka, gafuurxirka waa ay iska bixinayaan, balse waa inay xiraan daaha dhinacooda.